RCoA
Royal College of Anaesthetists

# Suuxdin – khataraha iyo saamaynta xun

# Qarqaryo/Dhaxan

## Ku saabsan buug yarahan

Buug yahrahani wuxuu ku saabsan yahay **qarqaryada ka danbaysa suuxdinta.** Tani waa saamaynta xun eed dareemi karto haddii aad gasho suuxdin guud oo qofkoo dhan ah ama suuxdinta qayb ka mid ah jirka. Waxay sharxaysaa sababaha keena qarqaryada iyo waxa kaala gudboon.


Waxaad website-keena ka akhriyi kartaa noocyada kala duwan ee suuxdinta kuwaas ood uga akhrinsan karo luuqado kala duwan halkan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages.

## Waa maxay qarqaryadu?

- Qarqaryadu waa falcelinta dabiiciga ah ee jirku bixiyo markuu qabow dareemo. Si uu diiranaado murqaha jirka ayaa isku soo urura sidoo kalana isla markiiba kala baxa, taas oo keenaysa qarqaryada.
- Qarqaryada ka danbaysa qalliinka waxay keeni kartaa raaxo la'aan, laakiinse khatar ma ahan waxayna inta badan istaagtaa 20 ilaa 30 daqiiqo gudahood.
- Qarqaryadu waxay jirkaaga ku sababtaa inuu ubaahdo ogsijiin badan. Waad ubaahan kartaa ogsijiin dheeri ah iyadoo lamarayo maaskaro.

## Waa sidee suurtagalnimada ay ku dhici karto?

### Laga soo qaaday 100 qof ee kasta



**Kudhawaad 15 ayaa qarqaryooda**

**Kudhawaad 85-na ma qarqaryoodaan**

Lamabaradaani waxay ka imaadeen cilmi baarisyo. Waxaad website-keena ka eegi kartaa halka aan ka soo xiganay lambaradeena:www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/evidence.

## Maxaa sababa qarqaryada ka danbaysa suuxdinta?

- Qolalka qalliimadu waxay noqon karaan kuwo qabow. Inta lagu guda jiro qalliinka qaybaha jirkaaga ayaa ubanaanaan kara hawada qabow heerkulka jirkaaguna hoos ayuu udhici karaa.
- Marmarka qaar daawooyinka suuxdinta iyo gaasaska ayaa saamayn kara signalada jirka ee xukuma heerkulkaaga.
- Qarqaryadu waxay iman kartaa kadib suuxdinta jirkoo dhan ah, iyo sidoo kale tan qaybaha jirka ahba(lafdhabarta ama xangulaha).

## Maxay Kooxda daryeelka caafimaadka samayn karaan?

Kalkaaliye ayaa marwalba kula joogi doona qolka soo kabashada qalliinka kadib. Waxay eegi doonaan heerkulkaaga waxayna ku siin doonaan buste diiran ama biyo qandac ah.
Haddii aysan tani wax kuutarin, kooxdu ama daaway ku siin doonaan si ay kuu diiriyaan ama dareere ayay kaa siin doonaan xididada.

## Maxaad adigu laftigaagu samayn kartaa?

Isku day inaad joogtaysid diiranaanta jirkaaga inta macquulka ah markaad sugaysid inaad aadid qolka qalliinka. Haddii aad diiran tahay ka hor qalliinka, waxay ubadan tahay inaadan sidoo kale qabow dareemin qallinka kadib.
Usheeg kalkaaliyaasha haddii aad qabow dareemaysid si ay buste kuu siiyaan.

Waxaad sidoo kale gurigaaga kala iman kartaa dhar iyo dacas diiran.

## Waa wax fiican in la ogaado

Haddii aad horay qarqaryo usoo dareentay suuxdinta kadib, taas micnaheedu ma ahan inaad sidoo kale mar kale qarqaryo dareemi doontid haddaad suuxdin kale mustaqbalka gashid.

## Afeef

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda ah, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Ma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad muhiim kuugu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buuggan yar oo keligiis ah waa inaan loola qaadan sidii talo. loomana isticmaali karo ujeedo ganacsi ahaaneed. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (bulshada turjubaanada ee Turjubaanada bilaa xuduudaah'.) Tayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

# Noo sheeg maxay kula tahay

Waxaan ku soo dhawaynaynaa talooyinka lagu hagaajinayo buug-yarahanta.

Haddii aad haysid wax faalin ah oo aad jeceshahay Inaad nala waadaagto fadlan ku soo hagaaji: patientinformation@rcoa.ac.uk

**Royal College of Anaesthetists**
Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG

# www.rcoa.ac.uk

Sixth Edition, November 2024

Buug yarahan waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

**© 2024 Royal College of Anaesthetists**
Buug yarahan waxaa lagu nuqulan karaa ujeedada soo saarista agabka macluumaadka bukaanka. Fadlan tixraac ishan asalka ah. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yarahaan ku isticmaasho daabacaad kale, waa in la bixiyaa mahadnaq ku habboon waxaana laga saarayaa calaamadaha, sumadaha, sawirada iyo astaamaha. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.